Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Barlamaanka Federaalka Soomaaliya

Golaha Shacabka

Hadal-qoraalka kalfadhiga 5-aad

Documentiga kalfadhiga 5-aad kulankiisa:19-aad

Kalfadhiga 5-aad **Tr:13/12/2014**

Kulankiisa:19-aad, sacadafuritanka.12:00 gh, sacada xiritanka.1:46 gd.

Guntinta: 142 xildhibaan.

Ajendaha:

1. **Furitaanka Aayadaha Qur'aanka Kariimka**
2. **Ansixinta Ajendaha**
3. **Akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Iibka Qaranka**
4. **Akhrinta 3aad Warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee la xiriirta Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka**
5. **Qeybinta go'aan Maamuleed Guddoonka Golaha oo ku saabsan soo koobidda Xubnaha Guddiga Dib-U-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka**
6. **Iyo wixii kale oo howl ah.**

Shir-Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Shee

Kh Cusmaan Jawaari.

Waxaa shirka furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari,waxaa lagu furey Aayadaha Qur'aanka kariimka uuna Akhriyay Xildhibaan:Sheekh Shaacir,Guddoomiyaha wuxuu xildhibaanada weydistay in ay Ansixiyan Ajendaha weyna Ansixiyeen.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka wuxuu ku soo dhaweyay, Guddoomiye ku xigeenka Guddiga Arrimaha Gudaha iyo Federaalka si uu Warbixinta Guddiga u Akhriyo

Xildhibaan:Daahir Aamiin Jeesow,wuxuu Golaha Barlamaanka ka hor Akhriyay,

Akhrinta 3aad warbixinta Guddiga Arrimaha Gudaha ee la xiriirta Hindise Sharciyeedka Dhismaha Guddiga xuduudaha iyo federaalka,guddoomiye ku xigeenka gudida wuxuu Akhriyay dhamaan guddiga ducumentigii ay soo diyaariyeen ayagoo ay waxna ay ku daren waxna ka bedelan.

Guddiga Arrimaha Gudaha,Maamullada Gobollada iyo AmnigaQaranka wuxuu di b u eegis ku sameynaya Hindise Sharciyeedka kor ku xusan oo akhrintiisa kowaad ka hor jeediyey Golaha Shacabka wasiirka wasaaradda Arrimaha Guddaha taariikhda markey ahayd**03.12.2014.**guddiga markii uu lafa guray nuxurka iyo siiqada hindisahan, dood dheerna la yeeshay wasiirka wasaaradda Arrimaha Gudaha,wux

Uu Golaha fadhigiisa 16aad horkenay warbixinta akhrintiisa labaadna taariikhda marka ay ahayd 13.12.2014. guddiga wuxuu si sharaf leh ugu dhageystay xildhibAanada soo jeedimahooda wax ka bedelida qoddobada hindisaha qaarkood iyo figradahooda guud oo ku abbaaran siyaasada guud ee federaaleynta dalka.

Intaa ka dib Guddoomiyaha Golaha wuxuu soo jeediyey,guddiga way mahadsanyihiin si dhaqso leh ayay ugu soo jawaabeen,wax badan oo laga bedelay ma jiraan xildhibaano waa in aan si wanaagsan u soo akhrisataan waa akhrintii 3aad maan

Ta ayaa ugu dambeysa xildhibaankii raba in uu ka hadlo akhrintan waa in uu magaciisa ii soo qoraa iina soo gudbiyaa aragtidiisa, sabtida codeyn baa lagalayaa waa in aad dhaman timadan.

Xildhibaan:Cabdi Cali Xasan,wuxuu soo jeediyey,sababta loo doortay Qodo.112, iyo Qod.135aad,labo siyaabood ayay kala sheegayaan,tan hore Barlamaanka aya soo magacabaya xuduudaha iyo federaalka,in aan gacanta loo galin wasiir iyo gud Di midnaba ,Barlamaanka in uu soo doorto qofka raba in uu guddigaas ka mid noq do oo sharciga waa faqsan arintaasna waxay keeni kartaa durid badan.

Xildhibaan:Maxamed Aadan C C,wuxuu soo jeediyey,Qod.4aad, xeerkan oo dhah

aya guddiga xuduudaha iyo federaalka wuxuu leeyahay xilal iyo awoodaha,waxa n ognahay In soomaaliya loo kala baxay beelo-beelo,waxan ognahay in maamul goboladii hore ay yihin 18 gobol iyo kuwo kale oo lagu sii daray,xuduudaha in ay ku ekaadan gobolada waa in wadankana an la galin xasilooni daro iyo qalaanqal.

Xildhibaan:C/raxmaan Axmed Suge,wuxuu soo jeediyey,qof walba sharciga ayaa ka weyn halaga fiirsado,waxaan qabaa in Dastuurka lagu dhaqmo Barlamaanka ha sameeyo 15xubnood oo guddiyada laga soo kala xuley.

Xildhibaan:C/laahi Ciise,wuxuu sheegey,soo xulitaanka Dastuurkay ku cadahay in wasiir soo xulo macquulna maahan,gobol kasto isagaa soo xulanaayo wax badan oo leysku qasay ayaa jira waqti hala siiyo oo lagu soo xulo.

GuddoomiyahaGolaha,wuxuu soo jeediyey,Qod.49,F.5aad,wuxuu leyahay,waxey qabaneysa xuduudaha federaalka dowladana waxey ku saleynaysa 1960kii.

Xildhibaan:Goodir,wuxuu sheegey,Qod.49,F.5aad, dad badan ayay dulmi ku tahay waxay tahay caqabad inta an la sameyn ayaa fiicnayd in loo codeeyo,waxaa sam eysmay gobolo awal aan horay u jirin waa in la yiraahdo waa la bedeli karaa.

Xildhibaan:C/laahi Goodax Bare,wuxuu sheegey,Dastuurka ayaa loo raacaya hadi I Gobol iyo degmo loo fiiriyo guddiga in uu san xayirnaaneyn.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,guddigan kama madax banaano Barl-amaanka wax alaale wixii uu soo daraaseyo wuxuu keenaya Barlamaanka.

Xildhibaan:Cabdi Cali,wuxuu sheegey, wasiirka waa in hada laga badelo si ayna u kenin xasilooni daro.

Xildhibaan:C/laahi Jaamac,wuxuu soo jeediyey,way soo noq-noqdeen,waxey ku haboonan lahayd in la sameyo qubaro si fasiraada leysugu keeni lahaa maadama uu Dastuurka yahay federaal waayo guddiga in uu wax ka bedelo 1991 si guddiga uu u shaqeyo howshana wadi kara.

Xildhibaan:Cabdi Axmed Dhuxulow,wuxuu sheegey,waxaan rabaa in la caddeyo Qod.112, Qod.135,ee soo jeedinta siinayo wasiirka in lays waa fajiyo xubnaha ka

mid noqonayo in ay soo xulaan golaha barlamaanka in la kabo guddiga oo lagu lifaaqo gurub ka mid ah barlamaanka oo lagu kalsoonan karo wsiirka kuma filno

Xildhibaan:Maxamed Aamiin,wuxuu soo jeediyey,waxaan qabaa in an aad ufiirino Qod.49, iyo 35aad,wuxuu magacabaya guddi madax banaan guddigas waa mid heer qaran,wuxuu u baahan yahay codeyn sax ah waa in uu ansixiyaa barlamaanka magacabida guddiga uu yeelan karo waa in darasad sax ah lagu sameeya.

Xildhibaan:Guure,wuxuu sheegey,Qod.135,ayaan u soo istagay odayaashii saxiixay Dastuurka waxey ku soo saxiixan anaga in aan leenahay axsaab anga ma lihin axsaab in wasaarada ay door qaadato barlamaankana uu ansixiyo.

Xildhibaan:C/raxmaan Xaaji Aadan Ippi,wuxuu soo jeediyey,waxaan qabaa xildhibaanadii soo jeediyay in guddi la sameeyo laga leexdo meesha dhibaatada ka soo galeyso,waxaa jira meelo tuuloyin aha ayaa gobolo loo magacabay Qod.135 wuxu duraa Qod.112, tuuloyin ayaa degmo noqday,waa in wasaarada iyo Barlamaanka isla shaqeyan,waa in Barlamaanka uu mar kasto marjac noqdaa.

Xildhibaan:Maryan Cariif Qaasin, waxey sheegtay,Barlamaanka wuxuu soo saari doonaa shuruuc fara badan sharciga waa in uu waa faqo Dastuurka,hadii uu wafAqi waayo Dastuurka sharcigas wuxuu noqon donaa mid sharci daro ah Qod.49, F.5aad,si an shaki ku jirin xuduudaha waxey xubin ka yihiin dowlada federaalka.

Xildhibaan:Bare Ugaas,wuxuu soo jeediyay,waxa ku jira wax yaabo badan oo is qilaafsan waa in Dastuurka la tixgaliyaa mar hadii la yiri guddi xuduudo hala sameYo waxaa loo baahan yahay in waqti la siiyo iyo in lagu kabo qubaro xuduudaha ah waa in arintaan laga fiirsado barabosalka qofka soo jeedinayo waa in la weydiya in uu ka baxay iyo in uu sidii wali u taaganyahay.

Xildhibaan:Dr:Cilmi,wuxuu sheegey,waxey iila muqataa in aan u deyno sidi 1990 Qiimeyn lagu sameeya waxaa laga eegi karaa oo la sameyn karaa midii degmo noqon karta iyo tii gobol noqon karta ee waa in aan la deg-degin dood badan ayaa ka dhalan karta waa in si tartiib ah oo daraasad cilmi ku dhisan an u sameynaa.

Guddoomiyaha Golaha,wuxuu soo jeediyay,Akhrintii intaas ayaa ugu dambeysay

3 awoodood ayaa jirta oo kala qeybsan mid waa sharci dajinta,mid waa fulinta,mi Dna waa Madaxweynaha,kalmada magacabista la yiraahdo Madaxweynaha wuxu magacabayaa saraakiisha waxeyna soo mareysaa prosses hadii u magacabo waaIn uu ku celiyaa xukuumada mahan hadii uu magacabo sidas ayay ok ku tahay,gol Aheena ma noqon karno sharci dajiye iyo fulin,awoodaha waa in loo kala qeybsan Ado,waxan leenahay 15guddi waxey wakiil ka yihiin wasaaradaha,Barlamaanka wuxuu aas-aasayaa hay'adaha guddiyada waxaa laga rabaa nooca federaalaynta in uu keeno ka dibna Barlamaanka ansixiyo waa in uu waa faqsanyahay DastuurkaXildhibaano kii is yiraahdo wax waa laga bedelikara ii soo gudbiya magacina qoral ah sabtida waacodeyn axadana waxaan uyeerayna wasiirka Amniga iyo Agaasim-aha nabadsugida.

IntaakadibGuddoomiyahaGolahawuxuukusoodhaweyay,**Wasiirudowlaha**
Wasaaradda Maaliyadda si golaha ugu hor Akhriyo, Akhrinta 1aad,Hindise Sharci-yeedka Iika Qaranka.

Wasiiru Dowlaha Wasaarada Maaliyadda Mudane:C/laahi Maxamed Nuur,wuxuGolaha Barlamaanka ka hor Akhriyay, akhrinta 1aad Hindise Sharciyeedka Iibka Qaranka,ahmiyada uuleeyahay sharcigaan waxaa ka mid ah iibka qaranka waxyaa baha la xiriira adeega qaranka wuxuu ku xusan yahay sharciga lambar 19 ee 10ka apriile 1978 iyo sharciga lambar 2 ee 14ka jenaayo 1979,waxeyna ku maamuleysa hababka sharciyadaas ku tilmaaman,maahan sharciyo hada la sameyay waxa la sameyay 1980kii,wuxuu ku dhexjiraa wakaalada rugta ganacsiga,waxeyna hoosta-geysaa wasaaradda ganacsiga maahan in ay hoostageyso wasaarada maaliyadda Madaxweynaha ayaa Degreto ku bixiyay,mudanayaal waa in aad qodob-qodob iyo cutub, cutub u dul istaagtaan waa in aad ku soo kordhisaan toosin iyo turxan bixin,waxaan idiinka rajeynayaa in aad noo meel marisaan.

Xildhibaan:Goodir,wuxuu soo jeediyay,waxaan ognahay iibka qaranka in lala mid-eeyay rugta ganacsiga sanadkii 1978,Qod.29,wuxuu leeyahay waxey hoostageysa Wasaarada ganacsiga wax la yiraahdo iib qaran majiro

Xildhibaan:Zaynab Maxamed Caamir,waxey sheegtay,wasaarada maaliyda waxey la soo shir timid oo ah iib qaran, waxan u arkayaa in dadka masaakiinta la bara ki-cinayo,waxey noo keentay wasaarada maaliyadda mid la qaadankaro maahan.

Xildhibaan:C/laahi Jaamac,wuxuu soo jeediyay,waxaan codsanay in naloo keeno sharciyo oo ah iibka qaranka ilaa iyo hada nalooma keenin,hadii barlamaanka la keenay oo ay shaqadooda wataan maxaa loo keeni wayay sumadaha.

Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda Mudane,C/laahi Maxmed Nuur,wuxuSoo jeediyay,Hada Akhrin un baan joognaa,waxa hada laga hadlayo waa iib agab ama adeeg si wax kala iibsiga ay u helaan fursad in qiimo sax ah wax lagu kala iib-sado,waxaan hada ka hadleynaa waa brosijar oo kaliya ,waxa la iibinayo waxey leeyihiin shuruuc, sumada waxaa gacanta ku heysa wasaaradda ganacsiga ayadaa idiin soo gudbineysa waa idiin faah-faahineysaa dhamaan sumadaha,miisaaniyada marka la keenayo wuxuu leeyahay labo tariifo canshuuraha bariga, iyo canshuur-aha badda,waxaan ku soo lifaaqnay 2014,tan hada ma dhameystirna waan idiin keeni doonaa waxaa gacanta ku hayo qubaro.

Xildhibaan:Dr:Cilmi,wuxuu soo jeediyay,nidaamkan waa tignikal wuxuu u baahan yahay faham badan iyo in uu soo jeediyo qof aqoon badan uleh dhinaca pracurm-entiga,waa in qof qabiir ah la helaa oo maalin dhan xildhibaanada fahamsiiya,wixi dowlada iska iibinayaan oo dhan ayaa ku xiran, wixii wax laga bedelo iyo tii an bed el u baahneyn.

Xildhibaan:Cali Nuur Boodaye,wuxuu sheegey,intaan la dhisin qandarasyada qar-anka ma guddiga ansixintiisa lala sugayaa mase wey wadanayaan shaqadooda.

Wasiir ku xigeenka wasaaradda maaliyadda Marwo:Fahmo,waxay soo jeedisay, procurmentiga waa dhameystiran yahay guddiga maaliyadda waxaa la soo siiyay tababar waan heysanaa qubaro sharciga iibka qaranka asagoo aan shaqeynaynin waxey kaliftay in wasaarad walbo sigaar ah wax u soo iibsato,wey dhamaan donta wasaaradaha qaarkood maqaban procurmenti,waxaan tababar siinay 18 dhalinya-ro,waxaan codsaneynaa in aan soo jeedin doono baristashin waxan donayna in na loo ogolaado.

Xildhibaan:Shuuriye,wuxuu sheegey,Hay'ad walba waxey ledahay masu'liyad bul-Shadeed,waxaan soo jeedinayaa in uu Golaha Barlamaanka yeesho tabarucaad dadka dhibaateysan waa in Barlamaanka yesho siyaasad suuragaleyso in uu taaku leeyo,isbitaalada,curyaamiinta iyo iskuulada.

Guddoomiyaha Golaha Shacabka,wuxuu soo jeediyay,waxaan u gudbineyna Gud-diga Arrimaha Bulshada, inta fasaxa, inta jiran iyo inta shaqada ku maqan, waxaa fasax shaqo ku maqna 50 xildhibaan,35xildhibaan wuu ka dhamadey fasaxa,15xildhiban shaqo ayay ku maqan yihiin, 24 xildhibaan fasax jiro ayay ku maqanyihiin, illaamaanta 11xildhibaan ayaa muteysatey Diggniin.

Fadlan xildhibaan la xiriira Habdhowraha,hadii aad goo-goneysay xaga imanshaha

Shir Guddoomiye,Guddoomiyaha Golaha Shacabka Mudane:Muxamed Sheekh Cusmaan Jawaari, uu shir Guddoominayay kalfadhiga 5-aad kulankiisa:19-aad,u Sheegey in uu shirka xiran yahay saacada markey aheyd 1:46gd